

LAMBARKA SIYAASADA	CIWAANKA SIYAASADA	LAGA BILAABO TAARIIKHDA
3549.7	SIYAASADA KAALMADA DHAQAALAHA	09/30/2023
NOOCA SIYAASADA	GOOBTA	KHUSEYSA
DHAQAALAH	ADEEGYADA DHAQAALAHA BUKAANKA	DHAMMAAN ISBITAALLADA

UJEEDDP:

Anagoo ilaalineyna dhaxalka iyo shaqadeenna sida urur samafal oo aan faa'iido doon ahayn oo ay ka go'an tahay inay bixiso daryeel caafimaad oo tayo leh dhammaan kuwa aan u adeegno qaab ka jawaabaya baahiyaha bulshadhena oo ixtiraamaya dhaxalka iimaanka, cisbitaalka Norton Healthcare waxay bixiyaan tas-hiilaadka degdeg ah. ama daryeel caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah dhammaan bukaanadha, oo ay ku jiraan bukaannada aan caymiska lahayn ama caymiska leh, iyada oo aan loo eegin awoodda ay u leeyihiin inay bixiyaan dhammaan ama qayb ka mid ah daryeelkaas.

Siyaasadan Dhaqaalaha Kaalmada ("FAP") waxaa loogu talagalay inay noqoto I.R.C. (Dakhliga furaha Gudaha ee 1986, sida wax laga baddalay) §501(r) – siyaasada kaalmada dhaqaalaha ee waafaqsan oo la sameeyay lagana faa'iidaystay :

- (A) go'aaminta u qalmitaanka bukaanka isbitaalka ee kaalmada dhaqaalaha;
- (B) dajinta habka ay bukaannada cisbitaalku u codsan karaan gargaar dhaqaale;
- (C) in la bixiyo aasaaska xisaabinta qadarka lagu dallacay bukaannada isbitaalka ee xaqa u leh;
- (D) xaqiiji in FAP si weyn loogu shaaciyay gudaha bulshooyinka cisbitaalka ee aan u adeegno;
- (E) xaqiiji in Norton Healthcare in aysan ku lug yeelan doonin ficillo uruurin aan caadi ahayn ka hor inta aan la samayn dadaallo macquul ah si loo go'aamiyo u-qalmitaanka bukaanka isbitaalka hoos yimaada FAP iyo;
- (F) xaqiijinta in bukaannada isbitaalka ee u qalma FAP aan lagu dallaci doonin wax ka badan inta guud ahaan lagu dallaco bukaannada kale ee leh caymis daboolaya daryeelka noocaas ah.

"Daryeelka Caafimadka lagama maarmaanka ah" waxaa loola jeedaa adeegyadan, oo ku salaysan qiimaynta shakhsiga u qalma baahidiisa caafimaad, kuwaas oo macquul ah amana loo baahanyahay in la aqoonsado, la baaro, la daweeyo, la saxo, lagu daweeyo, laga ciribtiro ama laga hortago cudur, xanuun, dhaawac, naafo, ama wax kale oo xaalad caafimaad ah oo ay ku jirto uurka, iyo kuwa waafaqsan go'aaminta "Baahida Caafimaadka" sida uu qeexayo Barnaamijka Medicaid ee Kentucky. Adeegyada noocan oo kale ah waa inay ahaadaan kuwo caafimaad ahaan ku habboon oo kujira heerarka guud ee la aqbalay ee ku dhaqanka caafimaadka wanaagsan. Intaa waxaa dheer, adeegyada noocan oo kale ah waa in lagu bixiyaa goobta ugu habboon, halkaas oo, ujeedooyin wax ku ool ah, laga yaabo in si badbaado leh oo waxtar leh loo bixiyo. Daryeelka Caafimaadka Lagama maarmaanka ah kuma jiraan wax daryeel ah oo la bixiyo marka hore si loogu qanciyo shakhsiga, daryeelaha shakhsiga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka, ama sababo la isku qurxiyo.

"Daryeelka Dagdagga" waxaa loola jeedaa adeegyadaas, oo ay ku jiraan baaritaanka iyo xasilinta, ee la bixiyo si loo daaweeyo xaalad caafimaad (1) oo isku muujisa calaamado daran oo halis ku filan (oo ay ku jiraan xanuun daran) sida maqnaanshaha daryeel caafimaad oo dagdag ah uu si macquul ah u filan karo qof miyir leh. Balse si ay u keento (a) dhigista caafimaadka shakhsiga (ama, marka loo eego haweeneyda uurka leh, caafimaadka haweeneyda ama ilmaheeda uurka ku jira) in khatar halis ugu jirto (b) dhaawac weyn oo ku yimaada waxqabadka jirka, ama (c) cillad daran oo ah xubin ama qayb kasta oo jidhka ah; ama (2) marka la eego haweeneyda foosha qabta, (a) ay jirto waqti aan ku filneyn oo lagu dhaqayo wareejinta badbaadada leh ee isbitaal kale kahor dhalimada, ama (b) wareejintaasi waxay khatar ku noqon kartaa caafimaadka ama badbaadada haweeney ama ilmaha uurka ku jira.

BAAXADDA:

FAP-gani waxa uu khuseeyaa dhammaan bukaannada isbitaalka ee leh awood la'aanta ay wax ku bixiyaan (marka laga reebo rabitaan la'aanta bixinta, taas oo loo arko amaah xun) qaar ama dhammaan

kharashaadka xaalad kasta oo dagdag ah ama adeegyada kale ee muhiimka ah ee caafimaadka ku salaysan ee goobaha soo socda:

Norton Audubon Hospital
Norton Brownsboro Hospital
Norton Hospital
Norton Women's and Children's Hospital¹
Norton Children's Hospital
Norton Children's Medical Center
Norton King's Daughters' Health
Norton Clark Hospital²

Norton Scott Hospital²
Norton Cancer Institute
Norton Cardiovascular Center - Springs
Norton Cardiovascular Center - Dixie
Norton Diagnostic Center - Dupont
Norton Diagnostic Center - Fern Creek
Norton Diagnostic Center - St. Matthews

SIYAASADA KAALMADA DHAQAALAHA:

Norton Healthcare waxay daryeel bilaash ah siisaa bukaanada xaqa u leh FAP-gan.

(A) Shuruudaha U qalmitaanka Kaalmada Dhaqaalaha

1. Guud ahaan, u qalmitaanka Norton Healthcare's FAP waxay ku salaysan tahay daganaanshaha kooxda qoyska, dakhliga, agabka iyo tirada dadka ku tiirsan.
2. Gaar ahaan, shuruudaha soo socda ayaa loo adeegsadaa si loo go'aamiyo u qalmitaanka FAP ee bukaan (ama dammaanad qaadaha bukaan):
 - a. Bukaan malaha caymis daryeel caafimaad ama waxaa haray haraaga aan la bixin kadib marka qorshahooda caymiska caafimaad la bixiyo amad uu diido dacwadooda³ iyo bukaan haddii kale uu xaq u leeyahay FAP-kan; iyo
 - b. Bukaan uma qalmo cayminta la kabo ama kaalmada dawladda sida Isbitaalka La wadaaga Adamiga ("DSH"), Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta ("CHIP"), Medicaid, Ururka Daryeelka la Maareeyo Medicaid ("MCO"), ama Hoosier Healthwise; iyo
 - c. Dakhliga kooxda qoyska bukaan wuxuu la mid yahay ama ka yar yahay 350% ee Tilmaamaha Faqriga Fadaraalka ("FPG"); iyo
 - d. Ilaha iyo hantida kooxda qoyska bukaan waxay la mid yihiin ama ka yar yihiin 200% ee tilmaamaha DSH; oo
 - e. Si aad ugu qalanto kaalmada aan dagdaga ahayn ee daryeelka lagama maarmaanka ah ee caafimaad, bukaan (ama dammaanad qaadaha bukaan) waa inuu sidoo kale ahaadaa qof daggan Kentucky, Indiana, Tennessee, Ohio ama Illinois. Shuruudda daganaanshaha ma khusayso daryeelka dagdagga. "Qofka daggan" gobolka waa shakhsi meesha ugu horeysa ee uu dagganyahay laga bilaabo taariikhda adeegga ee ku taalla gudaha gobolka.
3. Ujeedooyinka go'aaminta dakhliga iyo agabka kooxda qoyska, qeexitaannada soo socda ayaa lagu dabakhayaa:
 - a. **Bukaan** waa qofka daryeel kahelaha isbitaal aad looga baaraan dagay kaasoo hoos yimaada FAP-gan.

¹ Ayaa suurtagal ah lagu soo dallaco sida Norton Children's Hospital - St. Matthews

² Xaruntan isbitaalka, siyaasadan ayaa lagu dabakhi doonaa oo kaliya adeegyada la bixiyo Sebteembar 30, 2023 ama wixii ka dambeeya ((iyo kuwa kale ee xaqa u leh shuruudaha siyaasaddan).

³ Lacag bixin kasta oo uu dib uhelo qaataha caawimada ee hoos timaada FAP - iyada oo rafcaan loo qaadanayo sidehooda caymiska ama iyada oo loo marayo dacwad, gar-qaadasho, heshiis laga wada xaajooday, iwm. - waa in si dagdag ah loogu gudbiyaa Norton Healthcare iyo wixii gargaar hore ah ayaa lagu beddeli doonaa isla qaddarkaas. Fashilka in sidaas la sameeyo ayaa suurtagal ah in dib loo bilaabo kaalmada dhaqaalaha ee la ansixiyay oo ay keento dammaanad qaaduhu inuu mas'uul kanoqdo dhammaan haraaga iyada oo aan la hagaajin kaalmada dhaqaalaha.

- b. **Damaanad qaade** waa qofka dhaqaale ahaan masuulka ka ah bukaanka (haddii aanu jirin shakhsi kale oo ka masuul ah dhaqaalaha bukaanka, bukaanka ayaa sidoo kale noqda damaanadqaade).
- c. **Ku-tiirsane** waa shakhsi kasta oo uu sheegto sida bukaanka ama damaanad qaadka canshuur celinta dakhliga fadaraalka.
- d. **Codsade FAP** waa bukaanka ama damaanad qaadaha.
- e. **Xaaska** waxaa laga wadaa shakhsi qof kale guursaday iyadoo ay sabab u tahay guur xalaal ah meesha lagu galay, oo ay ku jiraan guurka dadka isku jinsiga ah ee sharciga ah, iyadoon loo eegin haddii ay jirto awoodda ay ku taal bixiyaha ama alaab-qeybiyaha bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka shaqsiga. ama uu qofka isqabaa ku nool yahay, ogolaado guurkaas inuu dhaco ama uu garawsado guurkaas.
- f. **Guur** waxaa laga wadaa guur xalaal ah halka lagu galay, oo uu ku jiro guurka dadka isku jinsiga ah ee sharciga ah, iyadoon loo eegin haddii awoodda ay u leedahay adeeg bixiyaha ama alaab-qeybiyaha bixiya adeegyada daryeelka caafimaadka shakhsiga ay ku yaalliin, ama kan lammaanuhu ku nool yahay, ay oggolaato guurkaas dhaca ama garawsada guurkaas;
- g. **Qaraabo**, marka loo adeegsado magac ahaan, waxa ku jira, balse aan ku koobneyn, xaaska shakhsiga.
- h. **Ilmo aan qaangaarka ahayn** waa qof kasta oo midkood (a) ka yar da'da 23 oo la nool waalid oo sheegata inuu yahay ku-tiirsane canshuur celiye fadaraal ee waalidkaas, ama (b) ka yar da'da 18 oo la nool mas'uul sharci ah isla gurigooda.
- i. **Koox Qoys** waxay isugu jiraan sida soo socota:
 - (1) Shakhsi iyo xaas kiisa/keeda; ama
 - (2) Waalid iyo/ama adeerro, carruurtooda aan qaan-gaarin iyo/ama carruurta ay-adeeraha u yihiin, oo dhammaantood ku nool hal deegaan; ama
 - (3) Lamaanayaasha aan isqabin ee haysta ugu yaraan hal ilmo oo aan qaan-gaarin oo ay wadaagaan, oo ay la socdaan wax kasta oo walaalo ah oo ilmahaas ah, dhammaan ku nool hal guri; ama
 - (4) Ilmo aan qaangaar ahayn, masuulka sharciga ah ee ilmaha, oo ay weheliso mid ka mid ah qoyska masuulka sharciga ah, dhammaan ku nool hal deegaan; ama
 - (5) Ilmo aan qaangaar ahayn, ilmaha uu dhalay shakhsigaas aan qaangaarin, iyo waalidkiis, ee dhammaan ku nool hal deegaan; ama
 - (6) Ilmo aan qaangaar ahayn, ilmaha ilmahaas aan qaangaarin, iyo waalidka kale ee ilmaha, iyadoon loo eegin xaaladda guurka, dhammaan ku nool hal deegaan (tani waxaa loo arkaa koox qoys oo ka duwan koox qoys oo kale oo sidoo kale deeganaas); ama
 - (7) Ilmo aan qaangaarin iyo awoowgiis ee ku nool hal guri (Awoowyaasha waa qeyb qoyska ah oo gaar ah ilaa ilmaha aan qaangaarin la sheegto in uu yahay ku tiirsane awoowyaal iyo awoowaha ay cadeyn karaan mas'uuliyadda sharciga ah); ama
 - (8) Lammaanaha sida sharciga isku isqaba ee ku nool hal guri oo ay ku jiraan guurka sharciga guud ee laga aqoonsanyahay gobolo kale ama halka mid kamid ah lammaanaha uu kan kale ku tiirsan yahay.
- j. **Dhaqaalaha koox qoys** waa wadarta lacagta ay ka heleen dhammaan xubnaha xubinta qoyska meel kasta ha ahaatee 12-kii bilood tagay.

- k. **Dhaqaalaha koox qoys / hanti** waxaa ku jira hantida aan sarrifnayn ama ma guurta ahayn (lacag caddaan ah, xisaabaadka bangiga, shahaadooyinka dhigaalka, iwm.) iyo hantida maguurta ah inkastoo qaar ka reeban yihiin sida soo socota:
- (1) Guri, alaab guri iyo hanti gaar ah oo ay ku jiraan dahabka, dharka iyo waxyaabaha kale ee dabeecadda shakhsiyadeed;
 - (2) Ilaa \$6,000 oo ah sinnaanta dakhliga soo saara hantida ee aan guryaha ahayn (ganacsi ama aan beec mustar) ee xeelada is taageeridda;
 - (3) Kaydsasahada xabaasha oo gaaraya ilaa \$1,500 qofkiiba, meelaha xabaasha oo ay ku jiraan goobta, sanduuqa, khasnadda, iyo walxaha la midka ah, iyo qorshayaasha duugista ee horay loo bixiyay, qandaraasyada iyo aaminaadaha xabaasha ee aan laga noqon karin.
4. U qalmida kaalmada hoos timaada FAP-ga ee adeegyadii hore ma aha dammaanad qaadka in adeegyada mustaqbalka ay xaq u yeelan doonaan. Go'aan ka gaarista u qalmitaanka hoos yimaada FAP-gan ee adeegyada la xiriira xaaladaha dagdagga ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah waxay shaqeyneysaa wax ka badan laba iyo toban bilood laga bilaabo taariikhda codsiga la saxeeexo.
 5. Haddii ay dhacdo in, sida uu dhigayo Xeerka Caymiska Biilka, Bukaanku uu doorto in aanu Norton Healthcare biil ka helin shirkaddiisa ama keeda caymis ee kharashaadka ku jira baaxadda FAP-kan, kharashaadkan oo kale uma qalmi doonaan kaalmada maaliyadeed ee hoos timaada FAP-gan.
 6. Haddii ay dhacdo in waalidka ama dammaanadku ay doortaan in aanu ku darin ilmahiisa ama ilmaheeda yar caymiskiisa oo uu diido in uu codsado caymiska Medicaid ama MCO ee ilmahaas ama ilmahan yar, markaas eedaha la xidhiidha ilmahaas ama ilmaha yar waa in Uma qalmo kaalmada dhaqaale ee hoos timaada FAP-kan.
 7. Daryeelka aan dagdaga ahayn, xitaa haddii loo baahdo caafimaad ahaan, uma qalmi doono kaalmada dhaqaalaha ee hoos timaada FAP-ga bukaan-socodka ka qaybqaata qorshaha caymiska ee u arka in Norton Healthcare iyo tas-hiilaadkeeda kala duwan ay yihiin "shabakad ka baxsan" ama uusan qorshahiisa caymisku ahayn. waxaa ku jira Norton Healthcare iyo kuwa la shaqeeya sida bixiye ka qayb qaadasho ahaan - ilaa Norton Healthcare ay ogolaato bixinta kaalmada dhaqaale ee bukaankan oo kale iyadoo lagu salaynayo gorgortanka hore ee caymiska ama xaqiiqooyinka kale ee alaabta iyo xaaladaha gaarka ah ee bukaankan.
 8. Norton Healthcare waxay go'aamisay, duruufaha aan caadiga ahayn ee maqan, adeegyada la xiriira barnaamijka bariatric waa *faa'iido* caafimaad ahaan laakiin aan *lagama maarmaan* u ahayn caafimaad ahaan. Adeegyada noocan oo kale ah uma qalmi doonaan kaalmada dhaqaalaha, bukaankuna waa inuu mas'uul ka yahay bixinta adeegyadan, oo dhan (ama hadhaaga kasta oo hadha ka dib bixinta qaddar kasta oo uu daboolay caymis gaar ah ama bixiyayaasha koox saddexaad).

(B) Habka Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha

1. Sida lagu taxay **Bandhiga A**, shaqaalaha Norton Healthcare ama wakiilada Norton Healthcare ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan bukaanka go'aaminta, iyo/ama inay qiimeeyaan bukaanka si loo go'aamiyo, u qalmidooda barnaamijyada kaalmada dawlada ama Kaalmada Dhaqaale. Codsiyada kaalmada dawladda ama kaalmada dhaqaalaha waxaa suurtagal ah in uu bukaanku si toos ah u buuxiyo waxaana la heli karaa sida lagu qeexay FAP-gan. Barnaamijkan waxa lagu maamuli doonaa kharashka Norton Healthcare iyada oo aan wax kharash ah laga qaadin bukaanka.
2. Si aad u codsato kaalmada dhaqaalaha ee hoos timaada FAP-kan, codsadhaha FAP-ga waa inuu:
 - a. dhammeystiro Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha- (eeg **Bandhiga B1**); iyo

- b. bixiyaan 3-dii bilood ee ugu dambeysay ee xisaabaadka baanka ee dhammaan xisaabaadka hubinta iyo kaydinta.
3. Macluumaad dheeri ah ayaa laga codsan karaa codsadhaha FAP haddii loo baahdo si loo caddeeyo macluumaadka lagu bixiyay codsiga iyo/ama bayaanada bangiga, sida koobiyada canshuur celintaada sanadka ka hor, jeegaga lacag bixinta, dukumeenti hubinta shaqo la'aanta, dukumeenti hubinta Lambarka Bulshada, kirada dukumeentiga hantida, bayaanka amaahda, qiimaynta cashuurta hantida ma guurtada ah, iwm.

(C) Xarunta Xisaabinta Lacagaha Lagu Dallacay Bukaannada U Qalma

1. **Xaalad dagdag ama daryeel kale oo caafimaad oo lagama maarmaan ah.** Norton Healthcare (oo ay ku jiraan hay'ado si weyn ula xiriira) kama dalacayaan bukaannada FAP u qalma wax ka badan xaaladaha dagdaga ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah marka loo eego qadarka guud ahaan lagu dallacsiyo ("AGB") kuwa leh caymis daboolka daryeelka noocaas ah. Taas badalkeeda, Norton Healthcare waxay siisaa daryeel dagdag ah ama daryeel caafimaad oo kale oo bilaash ah bukaan kasta oo buuxiya shuruudaha u qalmiitanka kaalmada dhaqaalaha ee hoos timaada FAP-gan. Norton Healthcare waxay adeegsataa hab dibu eegis waxayna tirisaa boqolkiiba AGB xarun kasta oo isbitaal ah iyadoo u qaybinaysa dhammaan qadarka sheegashooyinka dagdagga ah iyo daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka u ah ee ay ogolaatay Medicaid (ay ku jiraan Medicaid) ururada daryeelka la maareeyo iyo Medicaid khidmada-adeegga) inta lagu jiro sanadka kalandarka ee 12-ka bilood ee ka horreeyay, marka la isu geeyo kharashaadka guud ee la xiriira sheegashadaas. Norton Healthcare waxay soo dhajisaa nuqulka hadda jira ee sharaxaadda tirinta AGB iyo boqolleyda shabakadeeda kaalmada dhaqaale.
2. **Dhammaan daryeellada caafimaad ee kale** Bukaanka u qalma FAP waxa lagu dallaci doonaa wax ka yar kharashka guud ee daryeelka noocaas ah; Haseyeeshee, in bayaanka bilasha ay ku jiri karto kharashaadka guud ee daryeelka noocaas ah sida barta bilawga ah ee gunnooyinka qandaraaska ee kala duwan, qiimo dhimis ama dhimis suurtagal ah in lagu dabakho si loo gaaro qadarka wax ka yar ee kharashka FAP-ga u qalma. bukaanka ayaa laga filayaa inuu bixiyo.

Kharashaadka adeegyada aan caymin ee la siiyo bukaannada u qalma FAP ee u qalma Medicaid ama barnaamijyada kale ee daryeelka saboolka ah (ay ku jiraan kharashaadka maalmo ka badan mudada joogitaanka) waxa lagu dari karaa wadarta tirinta daryeelka samafalka ee Norton Healthcare.

(D) Shaacinta Daahafuran ee Siyaasadda Kaalmada Dhaqaalaha

Norton Healthcare waxay si weyn u shaacisaa FAP-gan, oo ay ku jiraan codsiyada FAP iyo soo koobida luqadda cad ee FAP-gan, islamarkaana bukaanka iyo xubnaha bulshada ay u adeegto ee u badan inay u baahanyihiin kaalmo dhaqaale, lacag la'aan, iyada oo loo marayo bandhigyo dadweyne oo muuqda oo qolalkeeda gurmadka ah. Iyo goobaha la dhigo, adigoo siinaya qoraal FAP ah oo kooban oo cad amana qayb ka ah hannaanka qaadashada ama sii deynta, iyo samaynta dukumeentiyadan iyo macluumaadkan sida fudud looga heli karo shabakadeeda iyo nuqullo warqad ah marka la codsado. Haddii shakhsi muujiyo doorbidka inuu ku helo dukumeentiyadan iyo macluumaadka si elektaroonig ah, Norton Healthcare ayaa sidaas kuu sameyn doonta, tusaale, shaashad elektaroonig ah ama dhalo, iimayl, ama ciwaanka bogga tooska ah ama URL. Halka ay ku habboon tahay, tarjumada dukumeentiyadan iyo macluumaadka ayaa sidoo kale la heli doonaa. Qoraal kasta oo biil ah waxa ku jiri doona ogaysiis qoran oo muuqda kaas oo ogaysiinaya oo ogaysiinaya qaataha wax kusaabsan helitaanka kaalmada dhaqaalaha ee hoos yimaada FAP-ga oo ay ku jiraan lambarka telefoonka xafiiska ama waaxda bixin kara macluumaadka kusaabsan hannaanka codsiga FAP iyo FAP, iyo shabakada tooska ah halkaas oo ciwaanka nuqullada dukumeentiyada FAP laga heli karo.

(E) Bixiyeyaasha Xarumaha Isbitaalka Daryeelka Caafimaadka ee Aan Norton ahayn

Waxaa suurtagal ah in bukaan helo daryeel dagdag ah ama daryeelka caafimaadka lagama maarmaanka ah gudaha xarunta isbitaalka bixiyaha xarunta daryeelka caafimaadka ee aan Norton ahayn. Daryeelka ay bixiyaan bixiyayaashani waxaa suurtagal ah in uusan daboolin FAP-gan. Liiska bixiyeyaashan iyo haddii daryeelka ay bixiyaan iyo in kale uu caymiyo FAP-gan waxa si bilaash laga shabakada Norton Healthcare ama haddii la codsado adigoo la xiriiraya waaxaha sida ku qoran **Bandhigga A**.

(F) Tallaabooyinka Uruurinta

Norton Healthcare kuma lug yeelan doonto falalka uruurinta aan caadiga ahayn iyada oo aan marka hore samayn dadaal macquul ah si loo go'aamiyo u qalmitaanka bukaanka isbitaalka ee hoos yimaada FAP. Tallaabooyinka ay Norton Healthcare qaadi karto iyadoo la ixtiraamyo lacag bixin la'aanta ee bukaanka waxay ku qeexan yihiin Xeer Biil iyo Uruurin gaar ah. Siyaasadan waxaa si bilaasha ah laga heli shabakada Norton Healthcare ama marka la codsado.

BANDHIG A - MACLUUMAADKA XIRIIRKA GARGAAR DHAQAALA

Wixii macluumaad ama kaalmo ah, fadlan booqo shabakadeenna ama nala soo xiriir:

Shabakada Kaalmada Dhaqaalah:**www.nortonhealthcare.com/FAP****Lataliyayaasha Kaalamada Dhaqaalaha:**

Norton Hospital	(502) 629-2115 -ama- (502) 629-8277
Norton Audubon Hospital	(502) 636-7303
Norton Brownsboro Hospital	(502) 446-8106 -or- (502) 446-8606
Norton Women's and Children's Hospital	(502) 899-6136 -ama- (502) 899-6207
Norton Children's Hospital	(502) 629-8281 -ama- (502) 629-8474
Norton Children's Medical Center	(502) 446-8606
Norton King's Daughters' Health	(812) 801-0676 -ama- (812) 801-8974 -ama- (812) 801-0482
Norton Clark Hospital	(812) 283-2808
Norton Scott Hospital	(812) 752-9729
Kooxda Adeegga Macmiilka:	(502) 479-6300

Fadlan u dir, faakis ama iimaylka codsiyada iyo dukumentiyada:

Cinwaanka Kaalmada Dhaqaalaha:**Waaxda Kaalmada Dhaqaalaha 14-7
Sanduuqa Boosto 35070
Louisville, KY 40232-9972****Faakiska Kaalmada Dhaqaalaha:****(502) 629-8883****Kaalmo Gargaar Iimayl:****FAP@nortonhealthcare.org**



BANDHIGGA B1 - CODSIGA KAALMADA DHAQAALAHA
(EEG BOGGA XIGA)

CODSIGA DARYEELKA CAAFIMAADKA NORTON EE GARGAARKA MAALIYADA

AKOON #: _____

MAGACA BUKAANKA: _____ TAARIKHDA DHALASHADA: _____ / _____ / _____ LAMBARKA AMNIGA BULSHADA: _____

CIWAAN: _____ TELEFOONKA GURIGA: _____ TELEFOONKA GACANTA: _____

MAGAALADA: _____ GOBOLKA: _____ FURAHA BOOSTADA: _____ IIMAYL: _____

BUKAANKA MA MUWAADIN MAREYKAN AH BAA? HAA MAYA BUKAANKU SI SHARCI AH MIYUU U DAGGANYAHAY MAREYKANKA? HAA MAYA
 SHAQO BIXIYAHA BUKAANKA (HADDII UU ILMO YAHAY, MACLUUMAADKA WAALIDKA): _____ TELEFOON: _____

SHAQO BIXIYAHA XAASKA (HADDII UU ILMO YAHAY, MACLUUMAADKA WAALIDKA): _____ TELEFOON: _____

HADDII AAD LEEDAHAY CEYMIS CAAFIMAAD, FADLIN BIXI:

MAGACA SHIRKADDA: _____ TELEFOONKA SHIRKADDA: _____

SIYAASADA #: _____ SIYAASAD HAYE: _____

JIIFITAANKAN MA WAXAA SABABAY SHIL GAARI? HAA MAYA HADDII AY TAHAY HAA, TAARIKHDA SHILKA: _____

MACLUUMAADKA QAREENKA: _____

AKOONKA MA WAXAY LA XIRIIRTA MAGDHAWGA SHAQAALAHA? HAA MAYA TAARIKHDA DHAAWACA: _____

MACLUUMAADKA QAREENKA: _____

LIIS GAREE MAGACA, DA'DA IYO XIRIIRKA XUBNAHA GURIGA EE BUKAANKA:

MAGACA	TAARIKHDA DHALASHADA	XIRIIRKA BUKAANKA
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____
_____	_____	_____

(HADDII AAD RABTO BOOS DHEERAAD AH, FADLAN XAGGA DAMBE EE BOGGA KU QOR)

DAKHLIGA (BIL-LE):

DAKHLIGA FAA'IIDADA BUKAANKA (HADDII BUKAANKU YAHAY ILMO, DAKHLIGA BIL-LAHA HOOYADA): \$ _____

DAKHLIGA FAA'IIDADA XAASKA (HADDII BUKAANKU YAHAY ILMO, DAKHLIGA BIL-LAHA AABAHA): \$ _____

HADDII AADAN LAHAYM DAKHLI, YAA BIXIYA KHARASHAADKAADA? _____

K-TAP: \$ _____ BAAGAMUUNDO: \$ _____

GARGAARKA ILMAHA / ALIMONY: \$ _____ BOONOOYINKA CUNTADA: \$ _____

AMNIGA BULSHADA: \$ _____ LACAGTA HAWLGABKA: \$ _____

LAMBARKA AMNIGA BULSHADA / NAAFANIMADA: \$ _____ DAKHLI KALE: \$ _____

➤ **WADARTA FAA'IIDADA DAKHLIGA BIL-LAHA:** \$ _____

KHARASHAADKA (BIL-LE)

KIRO / AMAAHDA GURIGA: \$ _____ CUNTO IYO ADEEGYO: \$ _____

TELEFOON: \$ _____ BIILASHA GURIGA: \$ _____

KHARASHAAD KALE: \$ _____

➤ **WADARTA KHARASHAADKA BIL-LAHA:** \$ _____

DHAQAALAH FARAKUTIRIS AH:**BAANK****QIIME**

JEEG: _____
 KEYD: _____
 LACAGTA SUUQA: _____
 LACAGTA _____
 BADEECO: 401K _____ 403B _____
 BOONKA: _____ IRA _____
 DHAQAALAH KALE: _____

➤ **WADARTA
 DHAQAALAH:** \$ _____

HANTI:**GURI:****HANTI KALE:**

_____	_____
MAGACAGA	MAGACAGA AMAAHDAHA GURIGA
_____	_____
QIIMAH HADDA	QIIMAH HADDA
_____	_____
SINNAANTA HADDA	SINNAANTA HADDA (QIIMAH HADDA LAGA JARAY WAXA LAGUGU LEEYAHAY)

GURYO KALE?

_____ (HADDII AY TAHAY HAA, FADLAN BIXI MAGACA AMAAHDAHA, CIWAANKA, QIIMAH HADDA IYO SINNAANTA

TANI WAXAY CADDEYN U TAHAY IN AAN CODSANAYO IN LA II TIXGALIYO GARGAARKA DHAQAALAH EE DARYEELKA CAAFIMAADKA NORTON.

WAXAAN HALKAAN KU OGOLAADAY inaan siiyo Norton Healthcare macluumaadka lagama maarmaanka u ah si loo go'aamiyo u qalmitaankay ga caawinta biilasha caafimaadka ee ka dhashay adeegyada aan ka helay xarumahooda. Waxaan fahamsanahay in dhakhaatiirtayda iyo bixiyeyaasha kale ee daryeelka caafimaadka ay yeelan karaan siyaasado gargaar dhaqaale oo iga caawin kara biilasha caafimaadka bixiyeyaasha. Si la mid ah, waxaan u idmay Norton Healthcare inay siiso nuqulka codsigayga bixiyeyaasha codsada inay ka caawiyaan go'aaminta inaan u qalmo dheefaha hoos yimaada barnaamijyadooda kaalmada dhaqaale.

Waxaan cadeynayaa in macluumaadka aan ku bixiyay codsigan uu yahay mid sax ah oo run ah ilaa inta aqoontayda iyo waxa aan aaminsanahay. Waxaan fahamsanahay in haddii aan bixiyay macluumaad been ah ama aan hakiyo macluumaadka codsashada kaalmada, codsigayga waa la diidi doonaa oo Norton Healthcare waxay sii wadi doontaa inay raacdo ururinta hadhaaga kasta oo taagan. Tusaalahaas, waxaa sidoo kale laga yaabaa in la igu soo oogo dacwad khiyaano awgeed. Waxaan aqbalay in aan ogeysiyo Norton Healthcare wixii isbeddel ah ee ku yimaada macluumaadka lagu bixiyey foomkan oo ay ku jiraan ciwaanka, lambarka taleefanka, iyo dakhliga.

_____ KOOXDA KAMASUULKA AH SAXEEXA

_____ TAARIKHDA

➤ **FADLAN KU SOO CEEB CODSIGA DHAMEYSTIRAN KOOYI KA MID AH 3 BILOOD EE BAYAANKAAGA BAANKA DHAMMAAN XISAABAADKA HUBINTA IYO KEYDINTA.**

KUSOO CELI MACLUUMAADKA:**NORTON HEALTHCARE****SBO FINANCIAL ASSISTANCE DEPT 14-7****Sanduuqa Boosto 35070****LOUISVILLE, KY 40232-9972**

TELEFOONKA ADEEGGA MACMIILKA #:

(502) 479-6300

FAAKISKA KAALMADA DHAQAALAH #:

(502) 629-8883

CIWAANKA IIMAYLKA:

FAP@nortonhealthcare.org

WIXII MACLUUMAAD AH BOOQO:

www.nortonhealthcare.com/FAP